




**F SAN** | Federatie Somalische  
Associaties Nederland



## FSAN NIEUWSBRIEF

Waa wargeys soo baxa saddex biloodba mar, kana faallooda arrimaha jaaliyadda Soomaalida Netherlands

CADADKII 19AAD 01 APRIL 2021

## TUSMADA WARGEYSKA

<b>Wacyi-geliyayaal qaatay tababar aqoon-korarsi ah .....</b>	<b>2</b>
XUSKA 6-DA FEBARAAYO 2021 .....	3
<b>FSAN oo soo bandhigtay waxqabadkeeda mashruuca gudniinka gabdhaha .....</b>	<b>4</b>
<b>Wacyigeliyayaal dib u tabar la siiyey (bijscholing).....</b>	<b>4</b>
<b>8DA MAARSO MAALIN HAWEENKA ADDUUNKA .....</b>	<b>5</b>
<b>FSAN iyo doorkeeda dacwada badda .....</b>	<b>7</b>
<b>Sharaxaad ku saabsan xanuunka coronavirus iyo talaalkiisa.....</b>	<b>8</b>
<b>Waxqabadka ururka Somalische Cultuur Aphen .....</b>	<b>9</b>

# Wacyi-geliyayaal qaatay tababar aqoon-korarsi

## Arrimaha sharciga Netherlands iyo gudniinka gabdhaha

**W**axaa 30-kii bishii Janaayo tababar aqoon-korarsi ah oo ku baxay qadka fogaan-araga ah (Zoom) loo qabtay ilaa 52 oo wacyigeliyayaal ah.

Intii uu socday kulankan, waxaa casharo ka bixiyey sharci-yaqaanad xagga xaquuqda bani'aadamka ah Dr. Annemarie Middelburg, taasoo sharaxaad ka bixisay arrimaha sharciga Netherlands ee la xiriira gudniinka gabdhaha iyo ciqaabta ka dhalan karta haddii gudniin lagu sameeyo gabadh.

Ka qeybgalayaasha tababarkan ayaa loo qeybiyey ilaa 5 kooxood oo mid waliba ay ka doodday mowduuc gaar ah, iyadoo qof walba oo rayi'giisa iyo waaya-aragnimadiisa halkaasi ka dhiibtay.

Dr. Annemarie ayaa u sheegtay wacyi-geliyayaasha in looga baahan yahay inay dadkooda kaga digaan dhibataada gudniinka uu u leeyahay hablaha, isla markaana dadka lagu baraarujiyo inay ka tagaan dhaqankan halista.

*“Waxa uu ahaa kulan muhiim u ah wacyigeliyayaasha inay wax badan ka fahmaan dhinaca arrimaha sharciga Netherlands ee ka dhanka ah gudniinka gabdhaha”*



*Muuqaalka ka qeyb galayaasha tababarka aqoonkorarsiga ee qadka Zoom-ka*

## XUSKA 6-DA FEBARAAYO 2021

Sanad walba waxaa aduunka laga xusaa maalinta joojinta gudniinka gabdhaha ee ku beegan 6-da Febaraayo. waxaana sanadkan 2021-ka munaasibadan lagu qabtay qadka online-ka maadaama uu weli jiro xanuunka coronavirus.

Sanadkan mowduucyadda la soo qaatay waxaa ka mid ah:

- Daryeelka caafimaad ee haweenka gudan
- Saameynta uu COVID-19 ku yeeshay barnaamijyada la dagaalanka gudniinka gabdhaha guud ahaan adduunka
- Waxqabadka hayadaha Defence for children Nederland iyo Plan internationale barnaamijyadda gudniinka gabdhaha ay ka wadaa wadanka Sierra Leone
- Riwaayad ku saabsanayd dhaqankaan oo wacyigalayaasha Rotterdam ka qaybqaatayn.



Munaasibadan waxaana ka qeyb galay 250 qof oo ka kala socday haydo kala duwan, wacyigalayaasha arrimahan gudniinka gabdhaha iyo ururada bulshada.

Sanadkan waxaa munaasibada 6-da February horseed ka ahaa Gemeentiga Rotterdam, Xarunta dhallaanka iyo qoyska ee Rotterdam iyo madasha 6/2 oo ay ku bohoobayn dallada FSNAN, Pharos, International plan, Defence for children Nederland.

Halkan ka daawo muuqaalka barnaamijka 6-da Febraayo ee ka hortaga gudniinka

[Daawo barnaamijka](#)



## FSAN oo soo bandhigtay waxqabadkeeda mashruuca gudniinka gabdhaha

Wasaarada caafimaadka, daryeelka iyo sport-ga ee dalka Netherlands ayaa 24-kii bishii February waxay shir ku qabsoomay qadka fogaan-araga ah la yeelatay dallada FSAN, kaasoo ku saabsanaa in dallada ay ka warbixiso wax-qabadkeeda dhinaca mashruucyada ay wado 4 sano ee la soo dhaafay.

Madaxa barnaamijka genderka ee dallada FSAN Zahra Naleie oo shirkan online-ka ah ka qeyb gashay ayaa soo bandhigtay wax-qabadka FSAN, maadaama uu meel gabagaba ah marayo mashruuca la dagaalanka gudniinka gabdhaha.

Zahra shirkan waxaa kala qeyb galeen qaar ka mida wakiilada loo tababaray wacyi-gelinta ka hortaga gudniinka gabdhaha, kuwaasoo ka kala soo jeeda wadamada Sudan, Egypt, Iraqi-Kurdi iyo Eritrea

Wasaarada ayaa ku qanacday soo jeedinta FSAN, iyadoo lagu balamay shirar kale oo midkan daba-socda, maadaama uu waqtiga yaraaday.



## Wacyigeliyayaal dib u tabar la siiyey (bijscholing)

FSAN waxay 6-dii March 2021 ay qabatay dib u tababar oo qeyb ka ah mashruuca ka hortaga gudniinka gabdhaha.

Tababarka ayaa waxaa ka faa'iideystay ilaa 12 qof oo loo kordhiyey aqoonta la xiriirta taranka Haween iyo caafimaadka iyo hab jeedinta casharada iyo diyaarintooda gaarahaan waqtiyadda baraarujinta wacyigelinta.

Tababarkan waxaa casharo ka bixiyey Harm Boll oo ka mida howlwadeenada FSAN iyo Marisa Abdulqani oo kalkaaliso caafimaad ka ah hay'ada caafimaadka GGD ee magaalada Den Haag.



## 8DA MAARSO MAALIN HAWEENKA ADDUUNKA

Zahra Naleie, madaxa barnaamijyada arrimaha Genderka ee dallada FSN, ayaa ka hadashay xuska 8da Maarso ee maalinta haweenweynaha caalamka, iyadoo ku tilmaantay maalin ahmiyad gaar ah u leh haweenka aduunka.

Wareysi gaar ah oo ay siiyey taleefashinka qaranka Soomaaliyeed ee SNTV ayey ku sheegtay in 8-da Maarso ay aheyd maalintii la soo afjaray cadaadis badan oo lagu hayey dumarka caalamka, isla markaana ay dib u helaan xaquuq badan oo ka maqneyd.

*“Maalinta 8da Maarso, waxay ku timid kacdoon ay sameeyeen haween ku sugnaa magaalada New York ee dalka Mareykanka 1908-dii, kuwaasoo dalbanayey in laga yareeyo saadacada ay shaqeenayeen oo badnaa iyo wax laga qabto xaaladaha ay ku shaqeenayeen oo adkaa iyo mushaarka loo kordhiyo iyo inay coddayn karaan waqtiga doorashada. Kacdoonkaasi waxa u uku fiday wadamadii horey loo oran jiray Midowga Sofiyeeti iyo qaar ka mida wadamada Yurub”.*



Zahra Naleie, madaxa barnaamijyada arrimaha Genderka ee dallada FSN

Fikrada ah in maalintan caalamiga la sameeyo, waxay ka timid haweeney lagu magacaabi jiray Clara Zetkin. Waxay haweeneydaasi soo jeedisay fikradan sanadkii 1910-kii shir caalamiya oo waqtigaasi haweenka shaqeyaa ay ku yeesheen magaalada Copenhagen ee dalka Denmark. Waxay ahaayeen 100 haween ah oo ka kala soo jeeday ilaa 17 dal, waxayna isku raaceen in la qaado fikradaasi si wadajir ah.

Waxaa markii ugu horeysay maalintan 8da Maarso loo dabaaldegay sanadkii 1911-kii wadamada Austria, Denmark, Germany iyo Switzerland. Qaramada midoobay waxay aqoonsatay 8 da Maarso 1975.

Zahra waxay sidoo kale maalinta 8da Maarso ay hambalyo u diray haweenka Soomaaliyeed meel kasta oo ay joogaan. “Haweenka Soomaaliyeed waa halgamayaal, laga soo bilaabo waqtigii gobanimo-u-dirarka, dowladahii rayidka, tii kacaanka ilaa bururka dalka iyo waqtigan

soo kabashada intaba. Haweenka Soomaaliyeed waxay soo mareen xaalado adag iyagoo door muuqda ku lahaa badbaadinta bulshada Soomaaliyeed.”

Zahra waxay u rajeestay in maalinta 8-da Maarso ee sanadkan 2021-ka ay u noqoto haweenka Soomaaliyeed mid ku helaan cadaalad iyo horumar.

Dhinaca kale, Zahra waxay sheegtay in sanadahii ugu dambeeyey dalka ku bateen tacadiyada loo geysanayo gabadhaha Soomaaliyeed, gaar ahaan kufsiga oo loogu darayo dil.

Waxaa nasiibdaro ah bay tiri in weli baarlamaanka Soomaaliya uusan weli ansixin sharciga ka hortaga dacadiyadda dumarka oo horey loo geeyey.

waxay ugu baaqday baarlamaanka soo socda in ay wax ka qabtaan tacadiyadda ka dhanka ah dumarka Soomaaliyeed. Waxaan sidoo kale bay tiri

*“Dhibaata kale ee jirta waxa weeye marka eedeysanaha la soo xiro in haddana si xeer jajab ah loo siidaayo sida igu maqaala ah oo weliba odoyal iyo xildibaano ay doodayaan ninka kufsiga geystay, taasina runtii waad mid dhiiragelinaysa in kufsiga uu socdo.” Ayey tiri Zahra.*



# FSAN iyo doorkeeda dacwada badda



Dallada FSAN waxay dadaal xoog leh ku bixisay inay daboosho baahida ah in jaaliyadda Soomaalida ay lala socodsiiyo wararka ku saabsan dhegeysiga dacwadda badda ee u dhexeysa Soomaaliya iyo Kenya kana furantay xarunta Maxkamadda Caalamiga ah ee Caddaaladda ee magaalada Hague.

FSAN waxay suurtagelisay in Soomalida Netherlands ay qadka Zoom-ka ay kala socdaan muuqaalka dacwada, iyadoo Avv. Musse Hersi oo ah garyaqaan ku takhasusay sharciga caalamiga degana wadanka Netherlands uu dadka Soomaaliyeed si fiican ugu sharaxay fahamka dacwada badda iyo waxa la isku hayo maalmahii ay dacwadu socotay.

Ali Ware, gudoomiyaha dallada FSAN ayaa inta aysan bilaaban dhageysiga dacwada waxa uu dadka Soomaaliyeed u sharaxay jadwalka maxkamada iyo sida ay u dhacayso. [Halkan ka daawo hadlka gudoomiyaha](#)

Dhegeysiga dacwadan waxay bilaabatay 15-kii Maarso 2021, waxaa Soomaaliya ku matalayay ergo uu horkacayo Ra'iisal Wasaare Ku Xigeenka, Mahdi Maxamed Guuleed iyo qareenno ajnabi ah.

Kenya waa ay ka maqnaatay dhegeysigan, mana jeedin dacwaddeeda afka ah inkasta oo ay hore u soo gudbisay iyada oo qoraal ah.

Badda la isku hayo baaxaddeedu waa ku dhowaad 100 kun Kilomitir oo isku wareeg ah. Dacwaddani waxay bilaabatay 2014 waxayna soo martay marxalado kala duwan.

Waxaa la filayaa in go'aanka Maxkamaddu uu qaato dhowr bilood. Soomaali aan badneyn laakiin uu qaarkood ka yimid waddammo kale sida Ingiriiska, Jarmalka, Sweden, Norway, Switzerland, Biljam iyo Talyaaniga ayaa yimid Hague si ay u dhiirri geliyaan ergada Soomaaliya.



# Sharaxaad ku saabsan xanuunka coronavirus iyo talaalkiisa



Mohammed Said. (Master of Arts in Advanced Nursing Practice)

Dhaqtar [Mohammed Said](#) oo ka howlgala isbitaalka weyn ee ku yaalla magaalada Eindhoven ee wadanka Netherlands, ayaa jaaliyadda Soomaalida u sharaxay dhibaataada xanuunka coronavirus iyo talaalkiisa hadda socda, isagoo ka qeyb galay barnaamij qadka Zoomka 14-kii bishii Maarso 2021.

Mohammed Said waxa uu si faahfaahsan uga sheekeeyey dhibaataada xanuunka, sida uu ku faafo, qaabka ugu haboon ee looga hortagi karo, noocyada talaalka hada jira iyo sida ay dowlada Netherlands u dejisay jadwalka ah sida loo kala hormarinayo dadka qaadanaya talaalka.

Waxa uu marka hore warbixiyey sida uu xanuunka coronavirus u waxyeeleeyo jirka qofka uu ku dhaco iyo sida loola tacaalo marka la dhigo isbitaalka.

Sidoo kale waxa uu sharaxaad ka bixiyey faa'iidada talaalka uu u leeyahay qofka si uu isaga difaaco xanuunka.

Mohammed Said, waxa uu muddo 20 sanno ah ka shaqeenayey isbitaalka ku yaal magaalada Eindhoven Waxa uu ka soo shaqeeyay qaybo kala duwan, sida qaybta Xanuunadda ku dhaca sambabka, qaybta dhuunta/sanka/dhegaha (KNO/ ENT), qaybta qaliinka Guud iyo qaliinka fudud. Haddana waxa uu ka shaqeeya qaybta Qaliinka daawaynta buurnidda ama cayilka iyo cuduradda cayilku uu keeno"

Halkan hoose ka daawo barnaamijka oo dhameystiran

**Welke soorten vaccins zijn er?**  
Vaccins proberen in het lichaam allemaal de natuurlijke immunerespons tegen een virus te activeren. Hoe werkt ons immuunsysteem en welke soorten vaccins zijn er?

**Levend, verzwakt virus**  
Virusreproductie in cellen. Gebruikt in vaccins tegen o.a. bof, mazelen, pokken, gele koorts en rode hand.

**Inactief virus**  
Geen virusreproductie in cellen. Gebruikt in vaccins tegen o.a. polio en hepatitis A.

**Stukjes virus-eiwit**  
Inbrenging stukjes virus-eiwit in het lichaam. Gebruikt in vaccins tegen o.a. griep, hepatitis B.

**Virale vector**  
Stukje erfelijk materiaal van gevaarlijk virus wordt uitgeknipt en overgezet in een ander, onschuldig virus. Aangepast virus vormt eiwitsteeksel zoals die van het gevaarlijke virus. Gebruikt in vaccins tegen o.a. SARS, MERS en ebola.

**Virus-RNA/DNA**  
Inbrenging erfelijk materiaal virus (RNA of DNA) in spiercellen, waar dan virale eiwitten worden geproduceerd. Geen bestaande vaccins bekend.

Immune system components: witte bloedcel (macrofaag), Macrofage neemt virus op en toont stukjes virale spike-eiwitten aan buitenkant, T-Afgevoelcellen activeren andere cellen, T-cellen, T-cellen vernietigen reeds met virus geïnfecteerde cellen, Plasmab-cellen produceren antilichamen die virus inkapselen, Geheugen-cellen, Vorming geheugen-cellen met informatie over virus-eiwitten om bij nieuwe besmetting snel tot actie over te kunnen gaan.

Source: who / rids

ANP zoom

## Waxqabadka ururka Somalische Cultuur Alphen a/d Rijn

Gudoomiyaha ururka Somalische Cultuur Alphen (SCA) [Mohamed Osman Guure](#) ayaa ka warbixiyey waxqabadka ururkooda iyo howlaha ay qabtaan.

Guure waxa uu sheegay in la aasasay 1999, waxayna aheyd buu yiri ujeedada inuu daboolo baahida waqtigaasi taagneyd oo aheyd inuu isku xir u noqdo jaaliyada Soomaalida iyo hay'adah dowlada iyo sidii wax looga qaban lahaa dhibaatooyinka, dhinaca caafimaadka, waxbarashada iyo barbaarinta ubadda.

Waxaan aad uga shaqeenay in Soomaalida halkan degan ay la jaan qaadaan noloshu dalkan iyo inay fahmaan dhaqanka iyo isdhexgal bulsho, gaar ahaan inaan caawino Soomaalida cusub.

Xaga dhaqaalaha cida ka caawiso mar uu ka hadlayey waxa uu sheegay in badanaa ay iyagu isku tashadaan, *“ Waxaana jirta lacago aan iska aruurino dadka xubnaha ka ah ururkan, way jiraan marar qaar dhaqaalo aan badneyn oo aan ka helno dowlada hoose ee magaaladan iyo ururada kale.”*



Guure waxa kale oo uu sheegay in ay meel ay wax ku qabsadaan (Buurthuis) oo uu ururka maamulo, halkaasoo ay Soomaalida isugu imaadaam maalmaha jimacaha iyo Sabtida, caruurtana looga caawiyo waxyaabo badan, sida casharada iskuulka, barashada quraanka, afka Soomaaliga iyo dhaqankiisa.

Hase ahaatee waxaa jirta buu yiri dhibaatooyin ardayda Soomaalida ka haysta xaga shaqa-barashada (Stage). *“Waxaana arrintaasi kala xiriirnay dowlada hoose ee Alphen aan de Rijn iyo shirkadaha kale.”*

Xiriirkeena iyo wadashaqeynta aan la leenahay dallada FSAN aad buu wanaagsan yahay, waxaanna hada ka wada shaqeeynaa arrimaha barbaarinta, gudniinka gabdhaha, ka hortaga coronavirus iyo isdhexgalka bulshada. Dhinaca kale Guure waxa uu qiray inaysan weli ku guuleysan inay helaan meel iyaga u gaar ah oo ay u madaxbanaan yihiin oo ay waqti kasta la isugu imaan karo.

Baahidaasi oo uu sheegay inay kala hadleen hay'adaha quseeya, ayna ku rajo weyn yihiin inay helaan dhismahaasi.

Dhinaca xiriirkooda dowlada hoose (Gemeente) waxa uu sheegay inuu aad u wanaagsan yahay, uuna ururkooda ka mid yahay dalad ay ku mideysan yihiin ururada dadka ajaanibka ee degan Alphen aan de Rijn.